

SOMALI
86_Toimi_näin_11_5_1
12.5.2020

Miyaad ka shakisantahay in aad qaadday cudurka fayruska Korona?

Ka samee shabakadda su'aalo-weydiinta astaamaha cudurka ama wac rugta talabixinta fayruska Korona

Su'aalo-weydiinta fayruska Korona waxaa laga helaa cinwaanka omaolo.fi

Adeegga Omaolo waxaad ka heleysaa tilmaamo waxqabad oo calaamadahaada ku saleysan haddii loo baahdana waxaad wakhti ka qabsan kartaa baaritaanka fayruska Korona.

Haddii aadan awoodin in aad qiimayso astaamaha cudurka, la xiriir rugta talabixinta fayruska Korona.

Haddii aad qabto astaamaha cudurka fayruska Korona, wac rugta talabixinta fayruska Korona ee magaalada Helsinki, tel. 09 310 10024 (maalmaha shaqada, saacadda 7–20), wakhtiyada kalana wac Caawimaadda heeganka, te. 116 117.

Rugta talabixinta fayruska Korona iyo Caawimaadda heeganka ayaa haddii loo baahdo kugu hagaya baaritaanka fayruska Korona iyo rugta caafimaadka Koronaha.

Baaritaanka fayruska Korona waxaa loo dirayaa dhammaan dadka qaba astaamaha cudurka fayruska Korona. Astaamahan waa caabuqa neefmareenka, shuban ama calool xanuun. Astaamaha caabuqa habdhiska neefmareenku waa xummad, qufac, dhuun xanuun, hargab, neefta oo adkaata iyo dareenka urta ama dhadhanka oo luma.

Baaritaannada fayruska Korona waxaa lagu sameeyaa goobo saamiga lagu qaado oo magaalada dhinacyo badan uga yaal. Baaritaanku wuxuu sheegayaa in aad cudurka fayruska Korona qabto iyo in kale. Goobaha saamiga lagu qaado laguma sameeyo baaritaanka lidka jirgalaha, kaas oo sheegaya in hadda kahor aad la bukootay fayruska Korona iyo in kale.

Bukaannada Korona waxaa lagu daaweynayaa Laakso iyo Malmi – ugu horreyn wac markasta

Dhammaan dadka reer Helsinki ee qaba calaamadaha habdhiska neefmareenka sare iyo bukaannada u baahan qiimeynta dhakhtarka waxaa lagu hagayaa in ay aadaan rugaha caafimaadka Korona. Rugaha kale ee caafimaadka laguma daaweynayo bukaannada qaba calaamadaha habdhiska neefmareenka sare.

Wac ugu horreyn markasta rugta talabixinta fayruska Korona ama Caawimaadda heeganka. Telefoonka ayaa laguugu sheegayaa tilmaamo ku saabsan waxa ay tahay in aad sameyso.

Sida ay u kala daran yihiin ayaa macaamiisha rugaha caafimaadka fayruska Korona loogu adeegayaa. Wakhti ballansasho kama jirto rugaha caafimaadka.

Dadka qaada fayruska Korona waxay badankood ku bogsoodaan guriga oo ay ku nastaan muddoo todobaad ah iyagoo aan u baahan daaweynta dhakhtarka. Haddii loo baahdo waxaa astaamaha cudurka lagu yareyn karaa daawooyinka xanuunka.

Rugta caafimaadka fayruska Korona ee Laakso Rugta caafimaadka fayruska Korona ee Malmi

Lääkärinkatu 8R
maalmaha shaqada 8 - 18

Talvelantie 4
maalmaha shaqada, saacadda 8 - 18

Marka ay xaalad degdeg ah jirto

Wac 112.